

SIDA LOOGA JAWAABO

MARKA TOOGLAHA FIRFIRCOON KU SUGAN YAHAY MEELAHA KUU DHAW

DHAKHSO U OGOW HABKA UGU MACQUULSAN AAD KU BADBAADIN KARTID NAFTAADA. WAXAY U BADAN TAHAY IN SHAQAALAHAY IYO MACAAMIISHA RAACAAN HOGGAAMINTA SHAQAALAHAY IYO MAAMULEYAASHA INTA LAGU DHEX JIRO XAALADDA TOOGLAHA FIRFIRCOON.

1. Orod

- Maskaxda ku haay jidka iyo qorshaha aad ku baxsatid
- Gadaal ku dhaaf waxyaabaha aad leedahay
- Ha la arko gacmahaada

2. Dhuumo

- Ku dhuumo meel uusan kaa arki karin toogtaha firfircoon
- Waxyaboo ku dadab meesha laga soo galoo meesha aad ku dhuumatay kaddibna xer albaabada

3. Dagaalan

- Tallada ugu dambeyso iyo marka naftaada ku jirto halis degdeg ah keliya
- Iskuday in aad itaal darreysid toogtaha firfircoon
- Ku dhaqaaq in aad jir ahaan weerartid adiga oo waxyaaboo ku tuura toogtaha firfircoon

WAC 911 MARKA AY AMMAAN TAHAY IN AAD SIDAAS SAMEYSID

SIDA LOOGA JAWAABO MARKA HIRGELINTA SHARCIGA TIMAADO GOOBTA

1. SIDA LOO DHAQMO MARKA HIRGELINTA SHARCIGA TIMAADO:

- Is xassili, adiga oo raaca tilmaamaha saraakiisha
- Isla markiiba kor u taag gacmaha iyo fidi faraha
- Ha la arko gacmahaada mar kasta
- Iska ilaali in aad dhakhsu u dhaqaaqdid dhanka saraakiisha, sida in aad iskudaydid in aad iyaga qabsatid si aad u heshid ammaan
- Iska ilaali in aad farta ku fiiqdid, ooysid iyo/ama qeylisid
- Ha istaagin in aad saraakiisha weydiisatid kaalmo ama tilmaan marka aad carraeysid, u dhaqaaq dhanka saraakiisha ka soo gashay xerada

2. MACLUUMAADKA LOO BAAHAN YAHAY IN AAD SIISID HIRGELINTA SHARCIGA AMA HAWL WADEENKA 911:

- Meeshay ku sugaran yahiin dhibaneyaasha iyo toogtaha firfircoon
- Tirada toogteyaasha, haddii ay ka badan yahiin hal
- Sifeynta jirka toogtaha (toogteyaasha)
- Tirada iyo nooca hubka uu haysto toogtaha (toogteyaasha)
- Tirada dhibaneyaasha suurtogalka ah ee meeshay ku sugaran

AQOONSIGA CALAAMADAHA DAGAALKA GOOBTA SHAQADA EE SUURTOGALKA AH

TOOGTABA FIRFIRCOON WUXUU AHAAN KARAA SHAQAALE IMINKA SHAQEYAA AMA SHAQAALE HORAY U SHAQEYN JIRAY. LA SOCODSHI WAAXDA ILAHA AADANAHA (HUMAN RESOURCES DEPARTMENT) HADDII AAD AAMINSAN TAHAY IN UU JIRO SHAQAALE MUUJIYA DABEECAD DAGAAL OO SUURTOGAL AH. TILMAAMEYAAASHA DABEECADDA DAGAALKA EE SUURTOGALKA AH WAXAA KA MID NOQON KARA MID AMA KA BADAN KUWA SOO SOCDA:

- Isticmaalka qamrada badan iyo/ama mukhaadaraadka sharci darrada
- Maqnaashada badan aan la sharixi karin; iyo/ama cabasho laga qabo jirka lana tilmaami karin
- Niyad Jab/Is Aruurin
- Isbadbadalks badan ee la xariira caatifadda darran, iyo jawaabo aan dagganeyn lana arki karo oo la xariira caatifadda
- Hadal badan oo ku saabsan dhibaatooyinka guriga
- Faalo badan aan loo baahneyn oo ku saabsan dagaal, hubka xabadaha iyo hubab kale oo halis ah iyo dambiyada dagaalka



La xariir waaxda maamulka dhismahaada ama waaxda ilaha aadanaha si aad u heshid macluumaad badan iyo tababar ku saabsan sida looga jawaabo toogtaha firfircoon ku sugar goobta aad ka shaqeysid.